



*a world of possibility*

4640 S. 144th St. Tukwila, WA 98168 | (206) 901-8000 | [tukwilaschools.org](http://tukwilaschools.org)

Ku socoto: Dhamaan Shaqaalaha iyo Qoysaska

Ka socota: Xafiiska Kormeeraha Guud

Taariikhda: Maarso 12, 2020

RE: Ogeysiiska Xiritaanka

Sidaad ogtahay, waxaan wajahaynaa dhibaato caafimaad daro oo aan horay loo arag shacabka. Waan ognahay inay toddobaadyadaan murugo noqotay madaama xaaladdu isu rogto maalinba maalinta ka dambaysa.

Maanta, Guddoomiyaha Inslee wuxuu amar ku bixiyay in la xiro dhammaan iskuullada ku yaal degmooyinka King, Pierce iyo Snohomis. Waxayna bilaabaneysa Talaadada, 17-ka Maarso. Si kastaba ha noqotee, iyadoo la raacayo amarkii maanta ee ka soo baxay Guddoomiyaha Gobolka Washington Jay Inslee, Dugsiyada Tukwila waxaa la xiri doonaa dhammaan laga bilaabo Isniinta, Maarso 16-keeda illaa Jimcaha, Abriil 24-keeda. Maalinta ugu horeysa ee iskuulka lugu soo noqonaya waa Isniinta, Abriil 27-keeda.

Xafiiska Gudoomiyaha ayaa sheegaya in xiritaanka kooban (laba usbuuc ama ka yar) iskuulada aysan ku filneyn inay saameyn ku yeeshaan isbedelka heerka cudurka. Tilmaanta Xafiiska Guddoomiyaha, oo ku saleysan macluumaadka la yaqaan iyo moodellada cudurka faafa, waa in la xiro dugsiyada muddadaas dheer.

Waxaan fahamsanahay in qorshahani u abuuri doono dhibaato qoysas badan, waxaan uga mahadcelineynaa dulqaadkaaga iyo iskaashigaaga. Waxaan iskuuladayada ka dhigney inay furnaadaan inta aan awoodnay, sida ay ku taliyaan maamulada caafimaadka dadweynaha ee gobolka iyo madaxda. Waan ogahay waxbarashada ka sokow, iskuuladu waxay siiyaan taageero muhiim ah bulshooyinkayaga iyo xiritaanku saameyn weyn ayey ku yeelan doonaan qoysaskeena.

Waxaan rabnay inaan la wadaagno macluumaadka ku saabsan adeegyadan aasaasiga ah ee soo socda ee ardayda iyo qoysaska:

### **Adeegyada Quraac iyo Qadada**

Quraac iyo qado ayaa lasiin doonaa carruurta meelaha qaarkood. Faahfaahinta lasocoshada dugsi kasta.

### **Daawooyinka Ardayda**

Daawooyinka ardayda waxaa soo qaadan kara xubnaha qoyska Jimcaha, Maarso 13 ama Isniinta, Maarj 16ka inta lagu jiro saacadaha iskuulka caadiga ah.

Barashada Muddada Xidhitaanka

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarista Dadweynaha (OSPI) wuxuu siidaayay talooyin ku saabsan waxbarashada haddii ay dhacdo maqnaansho dheer ama xiritaanka dugsi. Iyadoo la waafajinayo talo soo jeedintaas, Degmada Dugsi Tukwila ma siin doonto waxbarasho online ka ah ardayda. OSPI kuma talineyso nooca barashada online ka qadka tooska ah illaa dugsiyada ay hubin karto in ardayda oo dhami ay heli doonaan fursad isku mid ah oo ay wax ugu bartaan. Tukwila School District hada maheysto taageerooyin meesha jooga oo u ogolaanaya inay taasi dhacdo. Haddii OSPI ay cusbooneysiiso talo soo jeedinta, dib ayaan u qiimeyn doonaa waqtigaas.

Iskuuladu waxay u furnaan doonaan wax barashada ardayda ilaa jimcaha, maarj 13, iskuuladuna waxay ahaan doonaan kuwa furan Isniinta, Maarso 16 si loogu ogolaado shaqaaluhu inay dhameeyaan waxa shaqada u dhiman, dhameystirka dhibcaha, iyo aruurinta kheyraadka(resources).

Waxaan la shaqeyneynaa wada-hawlgalayaashayada si aan u go'aamino ikhtiyaarada daryeelka carruurta. Faahfaahin intaa ka badan ayaa soo socota. In kasta oo dugsi degmada uu xiran yahay, Caafimaadka Dadweynaha wuxuu ku talinayaa in ardayda ay guryahooda joogaan intii suurtagal ah ayna ka fogaadaan shirarka waaweyn ee bulshada si looga caawiyo yareynta suurtagalka gudbinta.

Waxaan si adag ugu boorinaynaa qoysaska inay raacaan tilmaamaha wargalinta ee King County Public Health ee fogeynta bulshada iyo taxadarka kale si loo yareeyo faafitaanka viruskan.

Waxaan idinku mahadcelineynaa dulqaadkaaga iyo fahamkaaga muddooyinkan iskudayaga ah sida aan uga shaqeyno inaan sii wadno bixinta adeegyada muhiimka ah ee ardayda iyo qoysaska.

Iyada oo qayb ka ah jawaabta coronavirus-ka, waxaan idiin soo diri doonnaa cusbooneysiin joogto ah oo leh macluumaadka iyo macluumaadka iimaylka, iskuulka dugsiiga, kanaalada warbaahinta bulshada iyo websaydhkeena [www.tukwilaschools.org](http://www.tukwilaschools.org).

Waxaan rabnaa inaan muujino oo idinku mahad celino dulqaadka bulshada Tukwila iyadoo aan ka shaqeyneyno caqabadaha maalinlaha ah ee coronavirus oo noo soo bandhigan.

Waad ku mahadsan tahay inaad kamid tahay bulshadeena.

Flip Herndon

Kormeeraha Guud, Dugsiyada Tukwila School District